

١

**رمضان شهر الجود والكرم والانتصارات**  
**Ramadaan waa bisha wax huridda iyo deeqda iyo**  
**guulaha**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

(الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ سِرًّا وَعَلَانِيَةً فَلَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ)

(Kuwa bixiya xoolahooda habeen iyo dharaarba qarsoodi iyo muuqaalba waxay ku mudan ajirkooda Allahooda agtiis, cabsina korkooda ma ahaato iyo murug midna), waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa kaasoo ku yiri xadiiskiisa sharfta leh:

(مَا مِنْ يَوْمٍ يُصْبِحُ الْعِبَادُ فِيهِ ، إِلَّا مَلَكَانِ يُنزِلَانِ ، فَيَقُولُ أَحَدُهُمَا :  
اللَّهُمَّ أَعْطِ مُنْفِقًا خَلْفًا ، وَيَقُولُ الْآخَرُ: اللَّهُمَّ أَعْطِ مُمْسِكًا تَلْفًا)

(Maalin ma jirto oo addoomaha ay waabariistaan hadday dhacdano waxaa soo degaya labo malag midkoodi wuxuu dhahaa: Ilaahayow baddal sii kan wax bixiya, midka kalena wuxuu dhahaa: Ilaahayow baabba' sii qofkaan wax bixinin)

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

#### **Intaas kaddib:**

Diinta islaamka waa diinta qiimaha iyo qaayaha leh iyo akhlaaqda sare, waxaa ka mid ah akhlaaqdan wanaagsan oo diinteena toosan ay noogu yeertay naguna boorrisay inaan ku dhaqanno: waa deeqsinimada waa khuluq ka mid ah akhlaaqda rususha, waa sifo ka mid ah sifooyinka dadka suuban, waxaa ka dhalanayo kalgacal iyo walaaltinnimo dadka dhexdooda, taas waxay ka dhigaysaa bulshada mid is haysata oo xoog leh oo ku dhisan isbahaysi iyo waxbixin, sidoo kale ikhlaas iyo daacadnimo, waxaa ku dhaboobayo hadalka rasuulka - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ ، وَتَرَاحُمِهِمْ ، وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ

إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عَضُوٌّ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى)

(Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashooda isu dhimrintooda waa sida hal jir

oo kale, marka xubin ay ka sheegato jirkoo dhan ayaa dareemaya dhafar iyo qandho).

Deeqda waa sifo ka mid ah sifooyinka Alle – *tabaaraka watacaalaa* - waana magac ka mid ah magacyadiisa suuban, Alle – *subxaanahu* - waa midka deeqsiga ah oo wax bixiya oo aan albaabkiisa la xirin, siismadiisuna aysan dhamaanin, qofkii tuugana aan lasoo celinin, qofkii rajeeyana uuna hoogin, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(إِنَّ اللَّهَ كَرِيمٌ يُحِبُّ الْكَرَمَ وَيُحِبُّ مَعَالِيَ الْأَخْلَاقِ وَيَكْرَهُ سَفْسَافَهَا)

(Alle waa deeqsi oo deeqsinimada jecel, wuxuuna jecel yahay akhlaaqda middeeda sare wuxuuna neceb yahay middeeda hooseysa), wuxuu kaloo leeyahay nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –:

(إِنَّ اللَّهَ كَرِيمٌ يُحِبُّ الْكَرَمَ، جَوَادٌ يُحِبُّ الْجُودَ...)

(Alle waa deeqsi oo deeqsinimada jecel, waana sakhi oo sakhinimadana jecel...)

Xadiiska qudsiga waxaa kusoo arooray:

(...يَا عِبَادِي كُلُّكُمْ ضَالٌّ إِلَّا مَنْ هَدَيْتُهُ، فَاسْتَهْدُونِي أَهْدِكُمْ، يَا عِبَادِي كُلُّكُمْ جَائِعٌ، إِلَّا مَنْ أَطْعَمْتُهُ، فَاسْتَطْعِمُونِي أُطْعِمْكُمْ، يَا عِبَادِي كُلُّكُمْ عَارٍ إِلَّا مَنْ كَسَوْتُهُ، فَاسْتَكْسُونِي أَكْسُكُمْ، يَا عِبَادِي إِنَّكُمْ تُخْطِئُونَ بِاللَّيْلِ وَالنَّهَارِ، وَأَنَا أَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا، فَاسْتَغْفِرُونِي أَغْفِرْ)

لَكُمْ ، .... يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوْلَكُمْ وَأَخْرَكُمْ وَإِنْسَكُمْ وَجَنَّتُمْ قَامُوا فِي  
صَعِيدٍ وَاحِدٍ فَسَأَلُونِي فَأَعْطَيْتُ كُلَّ إِنْسَانٍ مَسْأَلَتَهُ ، مَا نَقَصَ ذَلِكَ مِمَّا  
عِنْدِي إِلَّا كَمَا يَنْقُصُ الْمَخِيطُ إِذَا أُدْخِلَ الْبَحْرَ

(... Addoomadaydiyow dhammaantiina baadi ayaad tihiin, qofkii aan hanuuniyo mooyee, marka i weyddiista hanuun aan idin hanuuniyee. Addoomadaydiyow dhammaantiina waad baahan tihiin i weyddiista quud aan idin quudiyee. Addoomadaydiyow dhammaantiina waa arradan tihiin i weyddiista hu aan idin arrad bixiyee.

Addoomadaydiyow habeen iyo dharaarba waad gefeysaan, dembiga oo dhanna anigaa dhaafa, marka dembidhaaf iga dalbada aan idiin dembidhaafee... Addoomadaydiyow haddii kiina ugu horreeya iyo kiina ugu dambeeya insigiina iyo jinkiina ay isugu yimaadaan meel bannaan oo ay i weyddiistaan waxa ay doonayaan oon mid kasta siiyo wuxuu warsaday waxba hantideyda ka dhimi maayaan, waxaan ka ahayn irbad bad la geliyay ay ka dhinto biyaha badda).

Wuxuu leeyahay nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(يَدُ اللَّهِ مَلَأَى لَا يَغِيظُهَا نَفَقَةٌ ، سَحَاءُ اللَّيْلِ وَالنَّهَارِ ، أَرَأَيْتُمْ مَا أَنْفَقَ  
مُنْذُ خَلَقَ السَّمَوَاتِ وَالْأَرْضَ ، فَإِنَّهُ لَمْ يَغِضْ مَا فِي يَدِهِ).

(Gacanta Ilaahay way buuxdaa waxbixinta nusqaan uma keento, habeen iyo dharaar ayay qulqushaa, ma aragteen wixii uu bixiyay lagasoo bilaabo markuu abuuray cirarka iyo dhulka, ma naaqusin wixii gacantiisa ku jira).

Quraanka kariimka wuxuu caddeeyay deeqsinimada inay ka mid tahay akhlaaqda anbiyada iyo rususha, Alle wuxuu yiri isagoo ka hadlaya qisada Nabi Ibraahiim – *nabadgelyo korkiisa ha haatee* -:

(هَلْ أَتَاكَ حَدِيثُ ضَيْفِ إِبْرَاهِيمَ الْمُكْرَمِينَ \* إِذْ دَخَلُوا عَلَيْهِ فَقَالُوا  
سَلَامًا قَالَ سَلَامٌ قَوْمٌ مُنْكَرُونَ \* فَرَاغَ إِلَى أَهْلِهِ فَجَاءَ بِعَجَلٍ سَمِينٍ \*  
فَقَرَّبَهُ إِلَيْهِمْ قَالَ أَلَا تَأْكُلُونَ)

(Ma ku soo gaaray warkii martidii (Nabi) Ibraahiim ee sharafta lahayd \* markay u galeen ooy salaameenna, isna uu salaantii u jawaabay oo yidhi waxaad tihiin kuwo aan la oqoonin \* markaasu aaday ehelkiisii lana yimid dibi shilis (una gawracay). \* una soo dhaweeyay isagoo ku leh maxaad u cuni waydeen)

Deeqsinimadiisa weynideeda awgeed ayaa loogu bixiyay aabbaha martida.

Wuxuu nagu boorriyay Allaha cisada leh – *cazza wajalla* – in qaarkeena qaarka kale karaameeyaan sidii

aan u heli lahayn karamka Alle iyo in badan fadligiisa, Alle wuxuu leeyahay – *subxaanahu* -:

(وَلَا يَأْتَلِ أُولُو الْفَضْلِ مِنْكُمْ وَالسَّعَةِ أَنْ يُؤْتُوا أُولِي الْقُرْبَىٰ  
وَالْمَسَاكِينَ وَالْمُهَاجِرِينَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلِيَعْفُوا وَلِيَصْفَحُوا أَلَا تُحِبُّونَ  
أَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَكُمْ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ)

(Yeyna ku dhaaranin kuwa Fadliga (dheeraadka) leh iyo hodannimada inayan wax siinayn qaraabada, iyo masaakiinta iyo kuwa ku hijrooda Jidka Alle, hana iska cafiyaan hana saamaxaan, miyeydaan jecelayn inuu idiin dhaafo Alle, Ilaahayna waa dhaafe naxariista.) Alle wuxuu leeyahay:

(مَثَلُ الَّذِينَ يُنْفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ كَمَثَلِ حَبَّةٍ أَنْبَتَتْ سَبْعَ  
سَنَابِلَ فِي كُلِّ سُنْبُلَةٍ مِائَةٌ حَبَّةٌ وَاللَّهُ يُضَاعِفُ لِمَنْ يَشَاءُ وَاللَّهُ وَاسِعٌ  
عَلِيمٌ)

(Kuwa ku bixiya xoolahooda Jidka Alle waxay la mid yihiin xabbad (masago ah) oo bixisay todobo sabuul, sabuul kastana bixiyay boqol xabbo Alle waa u laablaabaa (ajirka) cidduu doono Allena waa deeq badane oo og.) Alle –*jalla wacalaa*- wuxuu leeyahay:

(لَيْسَ الْبِرَّ أَنْ تُوَلُّوا وُجُوهَكُمْ قِبَلَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ  
آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ وَآتَى الْمَالَ عَلَى  
حُبِّهِ ذَوِي الْقُرْبَى وَالْيَتَامَى وَالْمَسَاكِينَ وَابْنَ السَّبِيلِ وَالسَّائِلِينَ)

(Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac, laakin samafale waa ruuxii rummeeya Alle, iyo Qiyaame iyo malaa'igta iyo kitaabka (kutubta Alle), iyo nabiyaada, oo siiya xoolaha isagoo jecel qaraabada, iyo agoonta, iyo masaakiinta, iyo musaafirka, iyo kuwa tuugsada), wuxuu leeyahay Alle:

(وَيُطْعَمُونَ الطَّعَامَ عَلَى حُبِّهِ مِسْكِينًا وَيَتِيمًا وَأَسِيرًا \* إِنَّمَا نُطْعِمُكُمْ  
لِوَجْهِ اللَّهِ لَا نُرِيدُ مِنْكُمْ جَزَاءً وَلَا شُكُورًا \* إِنَّا نَخَافُ مِنْ رَبَّنَا يَوْمًا عَبُوسًا  
قَمْطَرِيرًا \* فَوَقَاهُمُ اللَّهُ شَرَّ ذَلِكَ الْيَوْمِ وَلَقَّاهُمْ نَضْرَةً وَسُرُورًا)

(Waxayna quudiyaan cuntada iyagoo jecel miskiinka iyo agoonka iyo kan xabbisan (dhibban) \* iyagoo dhihi waxaan idiin quudinnaa dar Alle, mana idinka doonayno abaalmarin iyo mahadnaq midna \* waxaan ka baqaynaa xagga Allaheena maalin wajimacbuus ah oo daran \* Allana waa ka dhawray sharka maalintaas, wuxuuna siiyay nuur iyo farxad), nabigeena - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee – wuxuu leeyahay:

(أَنْفَقُ ، يُنْفِقُ اللَّهُ عَلَيْكَ)

(Wax bixi Alle wax haku siiyee)

Bisha Ramadaan waxay ahayd bisha deeqda iyo waxbixinta iyo siismada iyo isbahaysiga walina way tahay, Nabigeena – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ahaa midka ugu deeqsinimo badan, wuxuu ugu deeqsinimo badnaa bisha Radamaan Ibnu Cabbaas - *Ilaahay raalli haka noqdee* – waxaa laga wariyay inuu yiri:

(كَانَ رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) أَجْوَدَ النَّاسِ ، وَكَانَ أَجْوَدُ مَا يَكُونُ فِي رَمَضَانَ حِينَ يَلْقَاهُ جِبْرِيلُ، وَكَانَ يَلْقَاهُ فِي كُلِّ لَيْلَةٍ مِنْ رَمَضَانَ فَيُدَارِسُهُ الْقُرْآنَ ، فَلَرَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) أَجْوَدُ بِالْخَيْرِ مِنَ الرِّيحِ الْمُرْسَلَةِ)

(Rasuulkii Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ahaa midka dadka ugu deeqsinimada badan, wuxuu ugu deeqsinima badnaa bisha Radamaan markuu Jibriil la kulmayo, wuxuu la kulmi jiray habeen kaste ka mid ah Ramadaan wuxuu la akhrisan jiray Quraanka, Rasuulka Alle - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu ka deeqsinimo badan yahay xagga khayrka dabeysha lasoo diray).

Nabigeena – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu ku boorrin jiray quudinta cuntada mar kaste, wuxuu yiri – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(أَيُّهَا النَّاسُ أَفْشُوا السَّلَامَ ، وَأَطْعَمُوا الطَّعَامَ ، وَصَلُّوا بِاللَّيْلِ وَالنَّاسُ نِيَامَ ، تَدْخُلُوا الْجَنَّةَ بِسَلَامٍ)



(Dadow salaanta faafiya, cuntada quudiya, habeenkana tukada dadka iyagoo hurdaya, jannada nabad aad ku gashiinee) wuxuu dadka jecleysiiyay – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - karaamaynta martida waqti kaste wuxuu yiri:

(مَنْ كَانَ يُؤْمِنُ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَلْيُكْرِمْ صَيْفَهُ)

(Qofka rummaysan Ilaahay iyo maalinta aakhiro ha karaameeyo martidiisa)

Wuxuu caddeeyay – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - quudinta cuntada iyo karaameeynta martida bishan inay aad u ajar badan tahay, wuxuu leeyahay – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –

(مَنْ فَطَّرَ صَائِمًا كُتِبَ لَهُ مِثْلُ أَجْرِهِ، إِلَّا أَنَّهُ لَا يَنْقُصُ مِنْ أَجْرِ الصَّائِمِ شَيْءٌ)

(Qofkii afuriyo qof sooman wuxuu leeyahay ajarkiisa oo kale isagoo aan wax laga dhimin qofka sooman ajarkiisa).

Ajarkan waxaa helaya qof kaste oo afuriya qof sooman ha ahaado hantiile ama faqiir qaraabo ama saaxib iwm, oraahda rasuulka – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – : (صائما) waa nakiro faa'idaynaysa cumuum taasoo ah in qof kaste soo galayo, iyadoo ay jirto quudinta dadka danta yar haddana waxaa jirto ujeedo kale oo sharci ah oo laga fahmayo hadalka nabiga – *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* –

oo ah adkeynta xiriirka dadka bisha samafka iyo xiriirka, inay ku kulmaan miiska qoyska iyo kan saaxiibada.

Sidoo kale macnaha laga fahmayo xadiiska waxaa soo galaya qof kaste u afuriyay si dhab ah inuu cunto ugu yeeray ama raashin u diyaariyay, ama si kale u afuriyo inuu ku sadaqaysto oo kale ama uu u hadiyeeyo wax uu ku afuro ama afur uu ku diyaarsan karo, hadiiska labo arrimood ayaa loola jeedaa: **midda koowaad** waa isbahaysi in dhexdeena bishan sharafta leh aan laga helin qof gaajaysan ama baahan ama wax haysanin, **midda labaad** in lays jeclaado iyo in la xoojiyo xiriirka bulshada dadka dhexdooda guud ahaan, bisha fadliga lehna gaar ahaan.

Asxaabta - *raalliga Ilaahay korkooda ha ahaadee* – waxay noosoo bandhigeen tusaalooyinka ugu qiimaha badan xagga wax huridda iyo siismada iyo bixinta hantida iyo nafta Ilaahay – *cazza wajalla* - dartii gaar ahaan waqtiga dhibka iyo rafaadka, iyadoo la xaqiijinayo isbahaysiga iyo isu kaalmaynta iyo isu naxariisashada, waa kuwan Ashcariyiinta Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – oo ku amaanaya wixii dhexdooda ahaa ee isbahaysi iyo isu kaalmeyn wuxuu leeyahay:

(إِنَّ الْأَشْعَرِيِّينَ إِذَا أَرْمَلُوا فِي الْغَزْوِ ، أَوْ قَلَّ طَعَامُ عِيَالِهِمْ بِالْمَدِينَةِ  
جَمَعُوا مَا كَانَ عِنْدَهُمْ فِي ثَوْبٍ وَاحِدٍ ، ثُمَّ اقْتَسَمُوهُ بَيْنَهُمْ فِي إِنَاءٍ وَاحِدٍ  
بِالسَّوِيَّةِ ، فَهُمْ مِنِّي وَأَنَا مِنْهُمْ)

(Ashcariyiinta marka ay hantidooda ku yaraato waqtiga duullaanka, ama cuntada caruurtooda ku yaraato oo ku sugan magaalada, hal maro ayay kusoo shubaan waxa ay haystaan, kaddib hal weel ayay ugu qeybsadaan si isla eg, iyaga aniga ayay iga mid yihiin, anigana iyagaan ka mid ahay).

Anas -Ilaahay raalli haka noqdee - waxaa laga wariyay inuu yiri:

(كَانَ أَبُو طَلْحَةَ أَكْثَرَ الْأَنْصَارِ بِالْمَدِينَةِ مَالًا وَكَانَ أَحَبَّ أَمْوَالِهِ إِلَيْهِ  
 (بَيْرُحَاءَ) وَكَانَتْ مُسْتَقْبَلَةَ الْمَسْجِدِ ، وَكَانَ رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ  
 وَسَلَّم) يَدْخُلُهَا وَيَشْرَبُ مِنْ مَاءٍ فِيهَا طَيِّبٍ ، قَالَ أَنَسُ (رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ) :  
 فَلَمَّا نَزَلَتْ هَذِهِ الْآيَةُ : {لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ} قَامَ  
 أَبُو طَلْحَةَ إِلَى رَسُولِ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم) فَقَالَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ  
 إِنَّ اللَّهَ تَعَالَى أَنْزَلَ عَلَيْكَ : {لَنْ تَنَالُوا الْبِرَّ حَتَّى تُنْفِقُوا مِمَّا تُحِبُّونَ}  
 وَإِنَّ أَحَبَّ أَمْوَالِي إِلَيَّ (بَيْرُحَاءَ) وَإِنَّهَا صَدَقَةٌ لِلَّهِ أَرْجُو بِرَّهَا وَدُخْرَهَا  
 عِنْدَ اللَّهِ تَعَالَى فَضَعَهَا يَا رَسُولَ اللَّهِ حَيْثُ أَرَاكَ اللَّهُ ، فَقَالَ رَسُولُ اللَّهِ  
 (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّم) : بَخٍ ، ذَلِكَ مَالٌ رَائِحٌ ، ذَلِكَ مَالٌ رَائِحٌ ، قَدْ  
 سَمِعْتُ مَا قُلْتَ وَإِنِّي أَرَى أَنْ تَجْعَلَهَا فِي الْأَقْرَبِينَ ، فَقَالَ أَبُو طَلْحَةَ :  
 أَفْعَلُ يَا رَسُولَ اللَّهِ. فَقَسَمَهَا أَبُو طَلْحَةَ فِي أَقَارِبِهِ وَبَنِي عَمِّهِ)

(Abuu Dalxa -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu ka mid ahaa dadka Ansaar ugu hanti badan, wuxuu ugu

jeclaa beertiisii (Bayruxaa), Waxayna ka soo hor jeedday masjidka Nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - intuu galo buu ka soo cabbi jiray biyo fiican oo ay laheyd.

Anas wuxuu yiri: markay soo degtay aayaddan: (**Ma gaaraysaan samafal intaad wax ka bixisaan waxaad jeceshihiin**), Abuu Dalxa Nebiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*- ayuu u tegay oo ku yiri: Rasuulkii ilaahayow Alle wuxuu kugu soo dejiyay aayaddan,: (**Ma gaaraysaan samafal intaad wax ka bixisaan waxaad jeceshihiin**) aniguna hantidayda waxaan u jeclahay (Bayruxaa), marka sadaqo ahaan xag Alle baan u baxsaday, anigoo ka rajeynaya ajarkeeda xag Alle iyo keydkeeda, ee iga guddoon Rasuulkii Alloow oo sidii Alle ku tuso ka yeel, Nebigu -*naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*- wuxuu yiri: “Waa khayr, waa maal aayatiin leh, wixii aad tirina waan maqlay, waxaan u arkaa inaad xigtadaada u qaybisid”. Abuu Dalxa -*Ilaahay raalli haka noqdee* - wuxuu yiri: Waa yeelayaa Rasuulkii Alloow, xigtadiisii iyo ilma adeeradiis buuna u qaybiyay).

Waxaa laga wariyay Ibnu Cumar -*Ilaahay raalli haka noqdee* - inuu yiri: Nin ka mid ah asxaabta nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - waxaa loosoo hadiyeeyay madax ri' wuxuu yiri: walaalkayga

hebel iyo caruurtiisa ayaa nooga baahi badan, wuxuu yiri wuu u diray, mid kaste midka kale ayuu u dirayay wuxuu gaaray todobo guri ilaa uu u soo noqdo kii ugu horreeyay waxaa soo degtay aayadda:

(وَيُؤْتِرُونَ عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةٌ)

**(Waxayna Naftooda ka hormariyaan (dadkaas) xitaa haddii ay baahi hayso).**

Waxay ahaayeen - *Ilaahay raalli haka noqdee* - kuwa ku tartama deeqda iyo waxbixinta, waxay u degdegi jireen huridda iyo siismada, iyagoo fulinaya amarka Ilaahay - *cazza wajalla* - iyo amarka nabigiis - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -, iyagoo raba oo rajaynaya wixii Ilaahay - *cazza wajalla* – u diyaariyay dadka deeqda bixiya.

Maxaa inooga baahi badan inaan ku dhaqanno khuluqdan weyn, tasoo ka fog bakhaylnimada iyo nafjecleysiga, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(مَا آمَنَ بِي مَن بَاتَ شَبَعَانَ وَجَارَهُ جَائِعٌ إِلَىٰ جَنْبِهِ وَهُوَ يَعْلَمُ بِهِ)

**(Ima rummeynin qofkii bariyo isagoo dhergan deriskiisana ku gaajeysan dhinaciisa isaguna og yahay)**

Wuxuu kaloo leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(يَا ابْنَ آدَمَ إِنَّكَ أَنْ تَبْدُلَ الْفَضْلَ خَيْرٌ لَكَ ، وَأَنْ تُمَسِكَهُ شَرٌّ لَكَ ،  
وَلَا تُلَامُ عَلَيَّ كَفَافٍ ، وَأَبْدَأُ بِمَنْ تَعُولُ ، وَالْيَدُ الْعُلْيَا خَيْرٌ مِنَ الْيَدِ  
السُّفْلَى)

(Ibna aadamow inaad hurto dheeraadka ayaa kuu khayr badan, inaad haystana way kuu shar badan tahay, lagugu eedi maayo waxa kugu filan, kana bilow qofkaad biisho, gacanta sarena waxay ka fiican tahay gacanta hooseysa)

Wuxuu kaloo leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* -:

(مَنْ كَانَ مَعَهُ فَضْلٌ ظَهَرَ فَلْيُعِدْ بِهِ عَلَيَّ مَنْ لَا ظَهَرَ لَهُ ، وَمَنْ كَانَ لَهُ  
فَضْلٌ مِنْ زَادٍ فَلْيُعِدْ بِهِ عَلَيَّ مَنْ لَا زَادَ لَهُ)

(Qofkii haysta gaadiid dheeraad ah, ha ugu deeqo qofkaan haysanin, qofkii haysto cunto dheeraad ah, ha ugu deeqo qofkaan haysanin)

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

\*\*\*

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha haato midka lagu khatimay anbiyada Ilaahay iyo rusushiisa oo ah sayidkeena Muxamed - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaantood.

### Walaalaha islaamka ahow:

Deeqsinimada iyo huridda nafta waa midda ugu sarrayso waxbixinta, deeqsinimada waa sifada dadka wanaagsan iyo dabciga bilista, waa midda ugu sarreysa darajooyinka ka doorashada, iyo nooca ugu qiimaha badan waxbixinta iyo karamka, gabyaaga wuxuu leeyahay:

يجود بالنفس إذ ضن البخيل بها والجود بالنفس أقصى غاية الجود

**Nafta ayuu hurayaa goorta bakhaylka masuugo \* nafta oo la huro waa deeqsinimada meesha ugu dambeysa.**

Noocyada deeqsinimada nafta kuwa ugu weyn waxaa ka mid ah waxa uu hurayo askariga dhufeyska ku jira, oo difaacaya dalkiisa iyo dhulkiisa iyo ehelkiisa iyo sharftiisa, isagoo ku sabraya oo dar Ilaahay ay ka tahay, nabigeena - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - wuxuu leeyahay:

(عَيْنَانِ لَا تَمَسُّهُمَا النَّارُ : عَيْنٌ بَكَتْ مِنْ خَشْيَةِ اللَّهِ ، وَعَيْنٌ بَاتَتْ تَخْرُسُ فِي سَبِيلِ اللَّهِ)

**(Labo indho naarta ma taabato: il cabsida Ilaahay la ooysay, iyo il barisay iyadoo Alle dartii wax u ilaalinayso).**

Wuxuu leeyahay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - :

(مَا أُغْبِرَّتْ قَدَمًا عَبْدٌ فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَتَمَسَّهُ النَّارُ)

(Addoon dar Ilaahay cagahiisa uma habaasoobaan oo ay markaas naarta taabato (ma dhacayso). Huridda qofka naftiisa uu huro waxay u damaanaqaadaysaa liibaanka adduunyo iyo kan aakhiro, Ilaahay wuxuu yiri:

(يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا اصْبِرُوا وَصَابِرُوا وَرَابِطُوا وَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ

تُفْلِحُونَ)

(Kuwa (xaqa) rumeeyow sabra oo sabarkana ku nagaada difaac ku jira kana dhawrsada Alle waxaad mudan tihiin inaad liibaantaane).

Waxaan shaki ku jirin Ramadaan inuu yahay bisha guulaha, bishan sharafta leh ayuu dhacay dagaalkii Badar, Ilaahay – *cazza wajalla*- wuxuu ku karaameeyay mu'miniinta guul xaggiisa ka timid iyagoo tiradooda iyo qalabkooda ay yaraayeen markii loo fiiriyo cadowgooda, Allaha xaqqa ah – *subxaanahu* - wuxuu leeyahay:

(وَلَقَدْ نَصَرَكُمُ اللَّهُ بِبَدْرٍ وَأَنْتُمْ أَذِلَّةٌ فَاتَّقُوا اللَّهَ لَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ \* إِذْ تَقُولُ لِلْمُؤْمِنِينَ أَلَنْ يَكْفِيَكُمْ أَنْ يُمَدِّدَ كُمْ رَبُّكُمْ بِثَلَاثَةِ آلافٍ مِنَ الْمَلَائِكَةِ مُنَزَّلِينَ \* بَلَىٰ إِنْ تَصْبِرُوا وَتَتَّقُوا وَيَأْتُوكُمْ مِنْ فَوْرِهِمْ هَذَا يُمَدِّدْكُمْ رَبُّكُمْ بِخَمْسَةِ آلافٍ مِنَ الْمَلَائِكَةِ مُسَوِّمِينَ \* وَمَا جَعَلَهُ اللَّهُ إِلَّا بُشْرَىٰ لَكُمْ وَلِتَطْمَئِنَّ قُلُوبُكُمْ بِهِ وَمَا النَّصْرُ إِلَّا مِنْ عِنْدِ اللَّهِ الْعَزِيزِ الْحَكِيمِ )

(Dhab ahaan buu idin ku gargaaray Alle (maalintii) Badar idinkoo tabaryar ee ka cabsada Alle waxaadna



mudan tihiin inaad ku mahdisaan \* markaad ku lahayd mu'miniinta miyuusan idinku filnayn inuu idinku xoojiyo rabbigiina saddex kun oo malaa'ig ah oo soo degaya \* waa na kaafiyaan ee haddaad adkeysataan oo aad Alle ka cabsataan oo ayna idiinku imaadaan degdagooda kan ah, wuxuu idinku xoojinayaa rabbigiina shan kun oo malaa'ig ah oo calaamaysan \* uma yeelin Alle (arrintaas) bishaaradiina awgeed mooyee iyo inay ku xasisho quluubtiina isaga, gargaar aan Alle agtiisa ka imaaninna ma jiro ee ah mid adag oo falsan).

Bisha Ramadaan ayay dhacday furashada Makka sannadka siddeedaad ee Hijriyada, waqtiga furashadan nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* – wuxuu sameeyay tusaalaha ugu fiican xagga akhlaaqda wanaagsan, gaar ahaan cafiska iyo masaamaxaadda iyo isu dhaafidda iyo naxariista, wuxuu isu keenay - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee* - dadka isaga dhibay oo soo saaray oo ku heshiiyay dilkiisa, kaddib wuxuu ku dhahay:

(مَا تَرَوْنَ أَنِّي صَانِعٌ بِكُمْ؟) قَالُوا : خَيْرًا ، أَخْ كَرِيمٍ ، وَابْنُ أَخِ كَرِيمٍ ،  
قَالَ : ( اذْهَبُوا فَأَنْتُمْ الطُّلُقَاءُ )

(Maxaad u malaynaysaan inaan idinku sameynayo?)  
waxay dhaheen: wanaag, waxaad tahay walaal fiican, ina walaal fiican, wuxuu yiri: ( baxa xor ayaad tihiin).

Bisha Ramadaan waxaa dhacay dagaalka Tobanka Ramadaan sannadka ١٣٩٣ H. lixda Aktoobar ١٩٧٣ M., dagaalkii cisada iyo sharafta, Ilaahay – *cazza wajalla* - wuxuu waafajiyay ciidankeena qalabka sida ee geesiyaasha ah, burburinta khuraafaadka ciidanka cadowga oo sheegan jiray inaan laga adkaan karin, ciidankeena wuxuu ku dhuftay dharbaaxo miyirka ka tagsiisay, kibirkiisna joojisay, caalamka oo dhanna ku qasabtay tixgalinta Masar iyo ciidankeeda qalabka sida, askariga masaariga dagaallamaya halqabsigiisa wuxuu ahaa: Ilaahay baa weyn, wuxuuna intaas ku darsaday soon iyo salaad iyo duco dhab ah, waxaa la helay guul weyn xadgudbeyaashana waa la eryay, halkan waxaan ku xuseynaa waxa ay hureen ciidankeena qalabka sida iyo masarteena qaaliga ah oo ah shuhado waaweyn oo ku waraabiyay dalka dhulkiisa diiggooda, iyadoo difaacaya diinta iyo dalka iyo dhulka iyo cirdiga.

Wali ciidankeena qalabka sida oo geesiyaasha ah ayaa ah tiirka amaanka masarteena qaaliga ah, iyo ummaddeena carabta iyo islaamka, wali dagaal sharaf leh bay kula jiraan raggooda daacadka ah kuwa argagaxisada oo sharta badan, maalin kaste naf cusub ayay huraan difaaca amaanka dalka iyo nabagalyadiisa iyo cisadiisa iyo sharftiisa awgood, shahaadada waxay ugu dadaalaan kuwa kale siday nolosha ugu dadaalaan, waxay diyaar u yihiin inay huraan wax kastoo qaali ah si

ay u difaacaan ciidda dalkan, inay gacanta ka jaraan qof kastoo raba inuu ku cayaaro amkaanka dalka iyo xasilloonidiisa, waa gaashaanka ummada iyo seefteeda intay taariikhda soo jirtay, taariikhda ayaana ah markhaatiga ugu fiican.

**Ilaahayow nafteena sii taqwaqeeda, daahiri adigaa ugu fiican qof wax daahiriye, adigaana ah gargaaraheeda iyo mowlaheeda.**